



Talooyin Xilliga Masiibada oo Loogu Talagalay Dadka Leh Naafu Dhaqaaq

Kaydin

- Alaabta xilliga degdegga ku kaydso xidhmo ama boorso dhabar oo lagu xidhay kursi-socodka, kursiga curyaanka ama mootada curyaanka.
- Alaabta gargaarka dhaqaaqa ee loo baahan yahay (bakoorado, qoryaha lagu socdo, kursiga socodka, kursiga curyaanka) ku kaydso meel kuu dhow oo ah meel joogto ah, haboon oo ammaan ah. Alaab gargaar oo dheeraad ah ku kaydso dhawr meelood, haddii ay suurtoagal tahay.

Xidhmada Alaabta Degdegga

- Gacmo-galisyo culus ku hayso xidhmadaada kaydka si aad u isticmaashid marka aad shaagga wareejinaysid ama dul maraysid qarsho/quraarad ama burbur.
- Haddii aad isticmaashid kursi curyaan oo matoor/injiin leh ama mootada curyaanka, ku fikir inaad haysatid baytari dheeraad ah. Baytari baabuur ayaa lagu beddeli karaa baytari kursi curyaan, laakiin baytari noocan ahi ma shaqeyn doono wakhti dheer sida baytariga kursiga curyaanka ee mudo dheer la isticmaali karo (deep-cycle battery). Weydii ciddii kaa iibisay inaad awoodi kartid inaad baytari dabeynsid adiga oo xidhkaha dabeynta (jumper cables) ku xidhaya baytariga baabuurka ama adiga oo baytariyada ku xidhaya nooc koronto beddele ah (converter) oo gaar ah oo galaya godka shidista sigaarka ee baabuurkaaga marka korontadu go'do.
- Haddii kursigaagu aanu lahayn taayiro aan banjarmaynin ama dalooshamaynin, hayso xidhmo kabiid (patch kit) ama daasad kabiid oo buufin ah (seal-in) si aad u kabtid taayirada hawadu ka baxday, ama hayso kayd dheeraad ah oo ah tuyuubka gala gudaha taayirka.
- Kayd ha kuu ahaado kursi curyaan oo gacanta lagu wado oo leh miisaan fudud, haddii aad heli kartid.

Waa inaad taqaanid agagaarkaaga

- Nidaam u yeel oo ammaan ka dhig farnijarka iyo alaabooyinka kale si loo helo jid lagu socdo iyo meelo la maro oo aan xanibaad lahayn.
- Haddii aad wakhti ku qaadatid meel ka sareysa dabaqa koowaad ee dhisme leh wiish (elevator), qorsheyso oo ku tababaro habab bixid ama qaxid oo beddel ah. Haddii loo baahdo, weydiiso gargaar aad ka heshid shabakaddaada taageerada.
- Haddii aanad isticmaali karin jaranjarada, ka hadal tabaha dalacista iyo qaadista ee adiga kuu shaqeyn doona. Waxa jiri doona wakhtiyo isticmaaleyaasha kursiga curyaanka ay qasab ku noqoto inay ka tagaan kursiyadooda iyada oo sababtu tahay in si ammaan ah looga baxo ama looga qaxo dhisme.
- Marmarka qaarkood in qof jaranjarada laga dejiyo iyada oo la sido ma ah wax la qaban karo haddii aan ugu yaraan laba ama saddex qof oo xoog leh aanay joogin si ay xukumaan kursiga. Aad bay muhiim u tahay in laga wada hadlo habka ugu ammaan badan ee lagugu qaadi karo haddii aad u baahatid in lagu qaado, iyo in gargaareyaasha la ogeysiyo wixii ah aag ay ka jirto jilicsanaan ama nuglaan. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in “qaadista dambiyeyaasha” ee caadiga ah ay halis u tahay dadka qaba daciifnimada neefsashada qaarkood.
- Waxa aad u baahan tahay inaad awoodid inaad bixisid fariimo gaaban oo ku saabsan sida meesha lagaaga qaadi lahaa.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-007
Somali